Washington State Health Care Authority

# Nidaamka Ka Cabashada Midab Takoorka

Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington (HCA) waxay samaysay nidaamkan cabashada soo socda ee looga baahanyahay dhinaca Qaanuunka Dadka Maraykanka ah ee qaba Naafonimo midkaas oo ahaa sannadkii 1990 (ADA) iyo xuquuqo rayid kale oo xiriir la leh sharciyada ku jira Qaybta 1557 ee Qaanuunka Daryeelka La awoodi karo. Haddii aad jeceshahay in aad u samaysid fayl cabasho oo aad ku eedaynaysid midab takoorka dhinaca Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington midkaas oo kusalaysan jinsi, midab, asalka dhallasho, galmo, jihayn galmo, nooca qofka, sheegashada qofka noociisa ama qofka uu yahay, caqiidadiisa, xaalad guur, diin, xaalad qof halyeel hore ama ciidan ah oo si sharaf leh uga tagay shaqada, da', naafonimo ama isticmaalid eey tababaran oo qofka haga ama adeeg xayawaan oo uu isticmaalo qof naafonimo qaba, fadlan raac nidaamka hoosta lagu xusay.

1. U samee cabashadaada qaab qoraal ah kuna dar macluumaadka kusaabsan midab takoorka aad ka cabanaysid, ku dar magaca, cinwaanka, iyo lambarka teleefoonka qofka cabanaya, iyo meesha, taariikhda, iyo sharaxaada mushkiladu waxa ay tahay. Qaabab bedelaadyo u ah samaynta cabashada, sida waraysiyo shakhsiyeed ama duubis cod ah oo cabashada kusaabsan, ayay samayn karaan dadka naafada qabba marka ay midaasi codsadaan. Ka wac Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington lambarkan 1-855-682-0787 si aad uga dhigatid ballamada loogu talogalay qaababka bedelaadyada ah ee samaynta faylka cabashooyinka. Dadka qabba naafonimo maqalka ama dhagaysiga ah fadlan soo waca 711 si aad u heshiin adeegaha gudbinta ama lasocoshada.

2. Keen faylka cabashada meesha Xafiiska U hoggaansanaanta ADA ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington muddo aanan dib uga dhicin 90 maalmaha kalandarka ah kadib xad gudubka la sheegtay.

   ADA Compliance Officer
   Washington State Health Care Authority
   P.O. Box 42704
   Olympia, WA 98504-2704

3. Gudaha 15 maalmaha kalandarka ah ee laga joogo marka la helo faylka cabashada, Shaqaalaha ama Sarkaalka U hoggaansanaanta ADA ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington ayaa si shakhsi ah kuula kulmi doono, teleefoon kuugula hadli doona, ama qaabab kale si looga hadlo cabashada iyo xalalka suurtogalka ah. Shaqaalaha ama Sarkaalka U hoggaansanaanta ADA ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka Washington wuxuu kuugu soo jawaabi doonaa qaab qoraal ah gudaha 15 maalmood oo kalandarka ah ee kullanka laga joogo iyo, halka ay suurtogaltahay, qaab bedelaad ah oo aad heli kartid, sida far wayn, Braille-Farta dadka indha la'aanta ah, ama cod la duubo. Jawaabtu waxay sharxi doontaa booska iyo doorashooyinka Maamulka Daryeelka Caafimaadka Washington ee loogu talogalay xalinta cabashada.

4. Haddii jawaabta Shaqaalaha ama Sarkaalka U hoggaansanaanta ADA ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington uusan xalin mowduuca, waxaad rafcaan ugu dirsan kartaa dhinaca Maamulaha Mashruuca Khatarta ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka Washington gudaha 15 maalmood oo kalandarka ah ee laga joogo helida jawaabta. Sida loo sameeyo rafcaanka waxaa lagu sharxi doonaa jawaabta aad ka heshid Shaqaalaha ama Sarkaalka U hoggaansanaanta ADA ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington.

   Gudaha 15 maalmood oo kalandarka ah ee laga joogo helida rafcaanka, Maamulaha Mashruuca Khatarta ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka Washington ayaa qaban qaabin doona in uu si shakhsi ah kuula kulmo, teleefoon kuugula hadlo, ama qaabab kale si looga hadlo cabashada iyo xalalka suurtogalka ah. Gudaha 15 maalmood oo kalandarka ah ee ku xiga la kullanka Maamulaha Mashruuca Khatarta ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka Washington ayaa kuu soo jawaabi doona si uu kuugu sheego xalka u dambeeya ee cabashada. Jawaabtu waxay noqon kartaa qaab qoraal ah iyo, halka ay suurtogal tahay, qaab bedel ah oo aad heli kartid, sida far qoraal waawayn, Braille-Farta dadka indha la'aanta ah, ama cod la duubo.

Macluumaadkan waxaa laga helayaa gudaha bogga internetka Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington ee ah hoosta liinkiga “Nondiscrimination” “Midabtakoor la'aanta” ee boggeena internerka: www.hca.wa.gov